

# Caawin lagaa caawinayo ku laabashada Soomaaliya

Haddii aadan haysan oggolaasho aad Norway ku joogto waa in aad Soomaaliya ku laabato. Waxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo sidii aad u laaban lahayd oo aad halkaas nolol cusub uga billaabi lahayd.

## Waxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo in aad Soomaaliya ku laabato haddii

- aad tahay muwaaddin soomaali ah
- diidmo lagaa siiyay codsigaagi magangelyada
- aad sugeyso jawaabta codsigaagi
- aad sharcila'aan Norway ku joogto

## Waxaad helaysaa

- caawin dhaqaale iyo mid baraatiko ah
- caawin ah sidii aad ku heli lahayd warqaaqo socdaal
- tigidhka diyaaradda ee Soomaaliya
- Warbixin iyo talabixin ay UDI iyo hey'adda caawinta qaxootiga ee Danmark (DRC) ay kugu siinayaan Norway iyo Soomaaliya.

## Caawin dhaqaale oo noocee ah ayaad heli kartaa?

- 10 000 oo karoon oo caddaan ah kaddib marka aad Soomaaliya ku laabato.
- Caawin shaqa-raadin, wax-barid ama billaabid ganacsi oo gaaraysa ilaa iyo 30 000 oo karoon taas oo Soomaaliya la soo marin doono DRC.

Qoysaska carruurta leh waxaa la siinayaa caawin dheeri ah oo gaaraysa 10 000 oo karoon oo lagu siinayo halkii ilmo ee da'diisu ay ka yar tahay 18 sano ee laabta.

## Sidan ayaad u codsanaysaa in lagaa caawiyo ku laabashada Soomaaliya

Foomka codsiga ayaad ka buuxinaysaa bogga internetka ee IOM [www.voluntaryreturn.com/](http://www.voluntaryreturn.com/)

Sidoo kale intaad foomka gacanta ku buuxiso ayaad boostada ugu diri kartaa IOM.

IOM, xerada qaxootiga ee aad ku nooshahay ama xafiiska gobolka ee UDI ayaa codsiga kaa caawin kara.

## **Halkee ayaad ku laaban kartaa?**

DRC waxay isu duwaysaa borogaraam laabasho oo lagu laaban karo meelo badan oo Soomaaliya ah. Kuwaas oo ah magaalooyin iyo meelo ay DRC

joogto ama dad la shaqeeya ay joogaan. W axaana ka mid ah

Muqdisho, Baydhabo, Doolow, Luuq, Kismaanyo, W allaweyn, Afgoo ye, Balcad, Jawhar, Beled W eyne iyo magaalooyinka ugu waaweyn Soomaalilaan iyo Buntilaan.

## **Maxaa dhacaya haddii aad ka timid meelo kale oo Soomaaliya ah?**

Haddii aad ka timid meel kale oo Soomaaliya ah oo aad doonaysid in aad halkaas ku laabatid, markaas laftigeeda waa lagaa caawin karaa

sidii aad halkaas ugu laaban lahayd.

Foomka codsiga ayaad ka buuxinaysaa bogga internetka ee IOM  
[www.voluntaryreturn.com](http://www.voluntaryreturn.com)

Sidoo kale intaad foomka gacanta ku buuxiso ayaad boostada ugu diri kartaa IOM.

IOM, xerada qaxootiga ee aad ku nooshahay ama xafiiska gobolka ee UDI ayaa codsiga kaa caawin kara.

Warbixin dheeri ah oo ku saabsan laabashada layska caawinayo ka eeg  
[www.udi.no/retur/](http://www.udi.no/retur/).